

Caymis baabuur oo ka wanaagsan, ka dhakhso badan, oo ka qiimo jaban

Nofeembar 21, 2024 Weydiimaha warbaahinta ([Media inquiries](#))

Dowladda Alberta ayaa soo kordhinaysa nidaam caymis baabuur oo cusub, kaas oo siinaya adeegyo wanaagsan oo degdeg ah dadka reer Alberta, isla markaana hoos u dhigaya qiimaha caymiska baabuurta.

Kadib markay ka maqashay in ka badan 16,000 oo reer Alberta ah iyagoo ka qayb galay sahamin khadka tooska ah (online) ah oo ku saabsan mudnaantooda caymiska baabuurta, dowladda Alberta ayaa soo bandhigaysa nidaam caymis baabuur oo gaar loo leeyahay oo diiradda saaraya daryeelka.

Hadda, caymiska gobolka Alberta ma ahan mid la awoodi karo ama diiradda saaraya daryeelka. Iyadoo qiimayaasha caymiska ay sarreeyaan, haddana dadka reer Alberta ee ku dhaawacma shilalka ma helaan daryeel caafimaad iyo taageero dhaqaale oo ku habboon, iyadoo nidaamka uu yahay mid adag in la fahmo. Marka si buuxda loo hirgeliyo, nidaamka cusub ee caymiska baabuurta ee Alberta wuxuu keeni doonaa daryeel wanaagsan oo degdeg ah dadka shilalka ku lug yeessa, iyadoo reer Alberta ay ku arki doonaan kayd gaaraya ilaa \$400 sanadkiiba.

"Reer Alberta waxay si cad u muujiyeen inay u baahan yihiin nidaam caymis baabuur oo bixiya daryeel wanaagsan, degdeg ah, oo la awoodi karo. Marka la hirgeliyo, nidaamkayaga cusub ee gaar loo leeyahay oo diiradda saaraya daryeelka wuxuu xoogga saari doonaa soo kabashada dadka reer Alberta, isagoo siinaya taageero wax ku ool ah iyo qiimayaal hooseeya."

Danielle Smith, Guddoomiyaha

"Qiimaha sare ee caymiska baabuurta wuxuu culays ku yahay reer Alberta. Markaan u wareegnay nidaam bixiya faa'iidooyin iyo taageero ka wanaagsan, waxaan siinaynaa daryeel wanaagsan oo degdeg ah reer Alberta iyadoo qiimuhu hooseeyo."

Nate Horner, Madaxweynaha Guddiga Kaydka iyo Wasiirka Maaliyadda

Reer Alberta ee ku dhaawacma shilalka hadda waxay ku qaadataa bilo si loo xalliyo sheegasho fudud, halka dhaawacyada halista ah oo beddeli kara nolosha ay qaadan karaan sannado si loo xalliyo. Intaa waxaa dheer, faa'iidooyinka caafimaadka iyo kuwa maaliyadeed ee ay helaan inta badan way dhammaadaan ka hor inta aysan si buuxda u bogsan.

Nidaamka cusub, dadka reer Alberta ee qaba dhaawacyada daran waxay heli doonaan daryeel iyo daaweyn inta noloshooda ka dhiman. Kuwa qaba dhaawacyo halis ah waxay heli doonaan daaweyn ilaa ay si buuxda uga bogsadaan. Isbeddelladan waxay la mid yihiin nidaamka caymiska ee Saskatchewan, halkaasoo darawallada qaladka leh lagu dacweyn karo magdhawga xanuunka iyo dhibaataada haddii lagu helo dambiyo sida wadista khamriga la xariira la qabtay ama wadista halista ah, ama dambiyo kale oo ka tirsan Xeerka Amniga Waddooyinka.

Shaqada nidaamka cusub ee caymiska baabuurta waxay u baahan doontaa sharci dejin guga 2025. Si loo habeeyo caymiska baabuurta ee 3.4 milyan oo reer Alberta ah, shirkadaha caymiska waxay u baahan doonaan waqti si ay nidaamka cusub u abuuraan oo u hirgeliyaan. Dowladda Alberta waxay filaysaa in nidaamka cusub si buuxda loo hirgeliyo Janaayo 2027.

Inta lagu jiro xilliga kalaguurka, laga bilaabo Janaayo 2025, xadka qiimaha darawallada wanaagsan waxaa lagu kordhin doonaa 7.5% sababtoo ah kharashyada sharciga oo sarreeya, kharashyada hagaajinta baabuurta oo kordhaya iyo kharashyada musiibooyinka dabiiciga ah. Tani waxay ka ilaalinaysaa darawallada wanaagsan kordhin qiime weyn iyadoo la hubinayo in bixiyeyaasha caymiska baabuurta ay sii wadaan inay maaliyad ahaan ku sii jiraan Alberta.

Reer Alberta ayaa si cad u sheegay inay weli rabaan in caymiska lagu saleeyo khatarta. Darawallada xun waxay sii wadi doonaan inay bixiyaan qiimo ka sarreeya darawallada wanaagsan.

Iyadoo la bixiyo faa'iidooyin caafimaad, dib u habeyn iyo taageero dhaqaale oo aad u wanaagsan, nidaamkan wuxuu taageeraa reer Alberta ee ku dhaawacma shilalka isagoo yareynaya saameynta kharashyada dacwadaha ee saameeya lacagta ay reer Alberta ku bixiyaan caymiska.

"In lacag badan lagu sii hayo jeebka reer Alberta waa habka ugu wanaagsan ee lagula tacaali karo sicir-bararka nolosha. Wareegtadan nidaamka caymiska baabuurta ee daryeelka u horreeya waxay taas ku gaari doontaa iyadoo hoos loo dhigayo qiimaha caymiska guud ahaan gobolka."

Nathan Neudorf, Wasiirka Awoodida iyo Adeegyada.

Xaqiiqooyin Degdeg ah

- Dowladda Alberta ayaa amrtay laba warbixin oo caymis baabuur, kuwaas oo muujiyey in kharashyada sharciga iyo dacwadaha ee la xiriira nidaamka hadda jira ee gobolka ay si weyn u kordhiyaan qiimaha caymiska.
- Warbixin ay soo saartay MNP sanadkii 2023 ayaa muujisay in dacwadaha la xiriira shilalka ay kordheen 48 boqolkiiba intii u dhaxeysay 2018 iyo 2022, iyadoo kharashyada dacwadaha ay ka badan yihiin \$1.2 bilyan doolar.
- Dowladda Alberta ayaa sameysay sahamin dadweyne oo online ah bisha Abriil 2024 si ay uga hesho jawaab celin ku saabsan caymiska baabuurta.

Xogta la xiriirta

- Dib u habeyn caymiska baabuurta ([Automobile insurance reform](#))
- Wadashaqayn ku saabsan caymiska baabuurta ([Automobile insurance engagement](#))

Wararka la xiriira

- Darawallada wanaagsan oo ka faa'iidayanaya isbeddelada caymiska baabuurta ([Good drivers to benefit from auto insurance changes](#) (Nov. 1, 2023))
- Tallaabo ka qaadista caymiska ([Taking action on insurance](#) (Jan. 26, 2023))

Warbaahinta kala duwan

- Daawo Wararka shirarka ([Watch the news conference](#))

Su'aalaha warbaahinta

Savannah Johansen

780-686-3521
Xoghayaha Saxaafadda, Xafiiska Gudoomiyaha

Justin Brattinga

587-357-2956
Xoghayaha Saxaafadda, Guddiga Kaydka iyo Maaliyadda.

Ashley M Stevenson

587-357-2141
Xoghayaha Saxaafadda, Awoodidda iyo Adeegyada.